

Xeerka Gudiga S-4: Xaadirista Ardayda iyo ka Reebida Dugsiga



TIXRAACYO

[S-4: Habraacyada Maamulka, Xaadirista Ardayda iyo ka Reebida Dugsiga](#)
[Xeerka Utah Ann. §53G-06-201 et seq., Shuruudaha Waxbarashada Qasabka ah](#)
[Xeerka Utah Ann. §53G-6-801, et seq., Xuquuqaha Waalidka](#)
[Xeerka Maamulka Utah R277-419, Koontada Ardayga](#)
[Xeerka Maamulka Utah R277-438, Diiwaan gelinta Labada Dhinac](#)
[Xeerka Maamulka Utah R277-607, Kahortaga Maamulka](#)
[Xeerka Maamulka Utah R277-609, Heerarka Qorsheyaasha Anshaxa LEA iyo Caawimaada Badqabka Degdega ah](#)
[Xeerka Maamulka Utah R277-610, Casharada Waqtiga la Fasaxay iyo Dugsiyada Dadwaynaha](#)

SIYAASADA

Guddiga Waxbarashada ee Degmo Dugsiyeedka Magaalada Salt Lake wuxuu iskaashi firfircoon la leeyahay ardayda iyo waalidiinta hormarka samaynaaya si loo xaqiijiyo in arday kasta uu dugsiga xaadiro maalin kasta. Gudigu wuxuu aqoonsan yahay in xaadirista joogtada ah ee dugsiga ay qayb muhiim ah ka tahay guusha waxbarashada ardayga, ay kor u qaadayso xiriirka ardaygu la leeyahay bulshada dugsigiisa, waxayna fursado u siinaysaa xiriirka muhiimka ah iyo isdhexgalka bulshada ee u dhexeeya dadka waawayn iyo ardayda. Xaadirista joogtada ah ayaa sidoo kale saamayn balaaran ku leh abuurista habdhaqannada togan ee nolosha oo dhan, sida masuuliyada, go'aan yeelashada, iyo imtiraamka kuwaasoo muhiim u ah abuurista xirfadaha u diyaar garoowga shaqada iyo guul ka gaarista kuleejka iyo nolosha.

Gudiga ayaa laga doonayaa inuu raaco shuruudaha waxbarashada qasabka ah ee gobalka ee ardayda da'daha lix sano ilaa 18 sano. Ku dhaqanka shuruudaha waxbarashada qasabka ah waxaa ku jira ku dhaqanka sharciyada gobalka iyo xeerarka maamulka ee quseeya maqnaanshiyaasha aan la fasixin iyo kuwa la fasaxay, goo-goysnimada, casharada xiliga fasaxa, adeegyada isbitaalka iyo kuwa guriga, iyo shardi dhaafyo looga cafinaayo xaadirista. Gudiga ayaa maamuleyaasha dugsiga u dhiiba masuuliyada abuurista qorsheyaasha xaadirista ee dugsiga oo dhan, kor u qaadista iyo la socoshada xaadirista joogtada ah ee ardayda, iyo xal u helida ciladaha goo-goysnimada.

Ujeeddada xeerkaan waa in la dhiiri geliyo xaadirista buuxda, ee dhammaan ardayda; loo yareeyo tirada maqnaanshiyaasha bilaa sababta ah, daahitaannada iyo ka bixida dugsiga kahor waqtiga; loo joogteeyo nidaamka diiwaanka xaadirista wanaagsan; aqoonso qaybaha habdhaqannada dugsiga; abuurista xeeladaha caawimaada waxtarka leh; loona yareeyo caqabadaha xaadirista si kor loogu qaado xaadirista dugsiga.

Degmadu waxaa ay dejisay habraacyadeedda gaarka ah ee loogu talagalay hirgelinta siyaasaddan guddiga iyada oo loo marayo [habraacyada maamulka ee la socda](#).

Ma jiro shaqaale ka tirsan dagmada ama arday lagu takoori karo shaqada ama barnaamij kasta ama hawl kasta ay dagmada leedahay oo ku saleysan da', midab, itaal darri, ahaashada lab/dhedig, aqoonsiga lab/dhedig, macluumaadka firka, asal qaran, xaamilonimada, isirka, diinta, kacsiya qofka, ama xaaladda waayo aragnimada qofka. Dagmada waxay ballan qaaday in si siman loo helo iyo in ay bixiso fursadaha siman xagga barnaamijyadeeda, adeegyada iyo shaqada kana mid ah siyaasadaheeda, hababka ashtakada, helitaanka barnaamijka, isticmaalka adeegyada dagmada, fududeynta iyo arrimaha kale ee la xariira Fursadda Shaqada Siman. Dagmada waxay kaloo dhamaan kooxaha dhallinta ku qoran liiska Title 36 Sharciya Mareykanka, kana mid ah kooxaha scoutka, siisay sinaan xagga helitaanka adeegyada dagmada. Qofka soo socdaa waxaa loo qoondeeyay inuu qabto waydiimaha iyo cabashooyinka ku saabsan takoorka sharci darrada ah, dhibaataaynta iyo aargoosiga. Tina Hatch, U hogaansanka iyo Baadhitaanada/Qodobka IX Isku duwaha, 440 East 100 South, Salt Lake City, Utah 84111, (801) 578-8388. Waxaad kaloo la xariiri kartaa Xafiiska Xuquuqda Madaniga (Office for Civil Rights), Denver, CO, (303) 844-5695.